**TIX: DGG/WWHTS/XW/0047/25** **Date: 28/04/2025**

**Ku: Ardayda galaysa Imtixaanka Shahaadiga =Xarumahooda**
**Ku:Maamulayaasha Dugsiyada Galmudug =Xarumahooda**
**Ku: Barayaasha Dugsiyada Dowladda Galmudug =Xarumahooda**
**Og: Taliska Police ka Dowladda Galmudug =Xarumahooda**
**Og: Wasaaradda Cadaaladda Dowladda Galmudug =Dhusamareeb**
**Og: Agaasimaha Imtixaanaadka WWH&TS Galmudug =Dhusamareeb**
**Og: Agaasimaha Guud WWH&TS Galmudug =Dhusamareeb**
**Og: Wasiir kuxigeenka WH&TS Galmudug =Dhusamareeb**
**Og: Wasiiru Dowlaha WWH&TS Galmudug =Dhusamareeb**

**Ujeedo: Xeerka ka hortagga qishka Imtixaanka**

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Galmudug waxa uu waajib ka saaran yahay Horumarinta iyo hagidda tayada Waxbarashada Galmudug.

Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada oo ka duulaya waajibaadka saaran isla markaasna maanka ku haya in lasoo saaro arday leh aqoon,akhlaaq iyo kalsooni ku dhisan wax aqrin iyo dadaal, una gogol xaaraya diyaargarowga imtixaanaadka Shahaadiga ah ee Dowladda Ee sannad dugsiyeedka **2024-2025**, waxa uu soo saaray xeerka ka hortagga qishka Imtixaanka.

1. **Qeexid Qish**: *Waxaa loola jeedaa ficil kasta oo lagu kasbado natiijo aan sharci ahayn inta lagu jiro imtixaanka.*

❖ **NOOCYADA QISHKA**

- Adeegsiga buugaag, waraaqo, ama qalab kale oo aan la ogolayn.
- Iskaashiga ardayda kale si loo helo jawaabaha imtixaanka
- Adeegsiga qalabka elektaroonigga ah (telefoonada, qalabka dhagaha, tablet iwm)
- Adeegsiga internetka ayadoo loo isticmalayo (Whatsup group, Website iwm)
- isku dayga in wax laga soo guuriyo arday kale.
- Isku galidda imtixaanka qof kale
- Ficil kasta oo loo arko qish, waxaa loo tixgelin doonaa jebinta sharciyada imtixaanka.

❖ **CIQAABTA QISHKA**

**Ficil kasta oo qish ah waxaa laga qaadi doonaa tallaabooyinka soo socda iyadoo la raacayo heerarka dambiga**:

1. Ardayga marka uu soo gelayo xarunta imtixaanka waxa uu marayaa baaritaan uu goob joog ka yahay kormeeraha ama kaaliyaha imtixaanka. (Habka baarista ardayga waxa uu ku cadyahay warqadda Anshaxa imtixaanka)
2. Haddii ardayga lagu qabto agabyada Qishka inta baarista hore lagu jiro waa in:
    a. laga qoraa xogta kaarka aqoonsiga.

-

b. Xiisadda/maaddada koobaad laga baajiyaa (cancel).
c. Agabka qishka lala celiyaa si uu meel usoo dhigto
d. Xarunta bannaanka looga saaraa, inta ay ka dhammaaneyso maaddada koowaad.

3. Haddii ardayga oo kujira fasalka lagu qabto agabyada wax lagu qisho waa in:
    a. laga qoraa xogta kaarka aqoonsiga
    b. xiisadda/maaddadaas banaanka looga saaraa
    e. Agabka qisha lala celiyaa si uu meel usoo dhigto
    c. Maadada uu qishay laga baajiyaa (Cancel)

4. Ardaygii lagu qabto asagoo arday kale wax waydiinaya ama ka guurinaya jawaabihiisa
    a. Lasiiyaa digniin kobaad
    b. Haddi markale lagu qabto Warqadda imtixaanka laga qaadaa
    c. Xiisadda/maaddaas banaanka looga saaraa

5. Ardaygii lagu qabto asagoo arday kale waraaqdiisa imtixaanka u qoraya waa in
    a. Imtixaankiisa maadadaas laga baabi'iyaa (Cancel)
    b. Ardayga imtixaanka loo qorayay laga baabi'iyaa (Cancel)
    c. labada arday laga qoraa xogta kaarka aqoonsiga.

6. Ardaygii labo goor lagu qabto asagoo wax ka qishaya agabka wax lagu qisho waa in:
    a. laga soo qoraa Xogta kaarkiisa
    b. laga joojiyaa maadooyinka u haray oo dhan
    c. lagu wareejiyaa agabka qishka ee laga qaaday
    d. Banaanka looga saaraa xarunta imtixaanka

7. Haddi lagu qabto qof u galaya imtixaanka arday kale waa in:
    a. laga qaadaa kaarka imtixaanka
    b. la baabi'iyaa dhammaan imtixaanka ardaygaas
    c. qofka lagu qabtay in uu ugalayo ardayga, lagu wareejiyaa police ka.

8. Haadii Xarun imtixaan ka dhacdo rabshado ay abaabuleen koox kamid ah ardayda imtixaanka galaysa oo ay handadaad ama waxleeyo u gaystaan howlwadeenada imtixaanka waa in:
    a. Lagu soo wargaliyaa xarunta Xiriirka Imtixaanka xiliga falku dhacay iyo sida ay udhacday
    b. Xogtooda lasoo diiwaan galiyaa ardayda falka gaysatay
    c. Imtixaankooda dhammaan la baabi'iyaa (Cancel
    d. Haddi fal kale oo aargoosi ah isku dayaan si looga hortago, lagu wargaliyaa policeka si tallaabo sharci ah looga qaado.

9. Haddii Magaalo ama Xarun imtixaan ay ka dhacdo Qish abaabulan oo ay ka qayb qaadanayaan qaar kamid ah bulshada deegaanka sida (maamulayaasha, bulshada, maamulka deegaanka, police iwm) waa in:

    a. Lagu soo wargaliyaa Xarunta Xiriirka imtixaanka dhacdada oo faahfaahsan
    b. Lagu wargaliyaa Hay'adaha ammaanka
    c. Imtixaanka laga baabi'iyaa deegaanka/Xarunta
    d. Agabka imtixaanka iyo howlwadeenada laga soo saaraa si ammaan ah

10. Barayaasha/maamulayaasha Dowladda ee lagu qabto ayagoo ka qayb qaadanaya fududaynta, fulinta qishka sida (group yada whatsupp ka, usoo dusinta telefoonada xiliga bareega, iyo talo bixinta qishka waa in:

    a. Laga soo qoraa kaarka aqoonsiga bare/maamul
    b. Lagu wargaliyo police ka
    c. La horgeeyaa maxkamadda si loo mariyo ciqaabta u qalanta.

-

11. Ilaaliyaha imtixaanka ee lagu qabto asagoo wax ka fududeynaya qishka ama waajib kiisa u gudan waaya sidii la faray waa in:
    a. Laga soo qoraa Xogta kaarkiisa aqoonsiga
    b. Xarunta laga saaraa
    c. Lagu wareejiyaa police ka
    d. La horgeeyaa maxkamadda si loo marayo ciqaabta u qalanta.

12. Haddii Bare lagu qoray xarun imtixaan uu diido ama imaan waayo sababo aan cadayn owgeed waa in:
    a. Lasoo qoraa xogta kaarkiisa baranimo
    b. Diginin la siiyaa hadii uu imaan waayo
    c. Lagu ganaaxo in mushaarka bil laga hakiyo
    d. hoos loo dhigaa Darajada hufnaan tiisa baranimo.

13. Haddii imtixaanka oo yaala xarumaha imtixaanka la dusiyo amaanadiisa sababo la xiriira :
    - In laga dhaco imtixaanka howlwadeenada
    - In howlwadeenada xarun imtixaan kula heshiiyaan koox gaar ah
    - In shaqaalaha kale ee daabacaada/dajinta dusiyaan macaluumaadka maadooyin gaar ah
    - In maado si qalad ah u qaybiyeen howlwadeenada xarun gaar ah oo ku qaldamay maado kale

**13.1 Tilaabooyinka laga qaadayo faldanbiyeedka imtixaanka:**

a. Haddii imtixaanka dhammaan laga dhaco ama howlwadeenada xarun imtixaan kula heshiiyaan koox gaar ah isla markaasna uu ku faafo baraha bulshada imtixaanka dhammaan waa labaabi’inayaa(Cancel), shaqaalaha dib baa loo soo celinayaa, imtixaan kale iyo jadwal kale ayaa loo diyaarinayaa.
b. Kooxda faldanbiyeedkaas ka danbaysay (Howlwadeen imtixaan ama burcad kale) waxaa lagu wargalinayaa Police ka, Maxkamadda ayaa la horkeenayaa si falkaas loogu ciqaabo.
c. Haddii imtixaanka maadooyin gaar ah ay baxaan (qalad dhacay ha u baxdo ama howlwadeenada qaar ha dusiyaane), maadooyinkaas waa la baabi’inayaa, imtixaan gaar ah ayaa dib loogu dejinayaa.
d. Baarintaanka falkaas cidda uu ku caddaato waxaa la marinayaa ciqaab lamid ah isla qodobkan faqrada (b) ee sare ku xusan.

14. Howlwadeenada imtixaanka (dejiyeyaasha, daabacayaasha, dheelitireyaasha, kormeereyaasha, kaaliyeyaasha iwm) marka ay saxiixaan warqadda xog-dhowrista imtixaanka kadib haddii lagu qabto iyagoo ku lug leh ka qayb-qaadasho qish Sida: u qishid imtixaangale, Xaalad abuur waqtiga imtixaanka, dusinta iyo fududeynta xogaha imtixaanka iyagoo dano gaar ah ka leh sida: deegaan gooni ah, shaqsi gaar ah, handadaad, cabsigalin lagu sameeyey darteed ama dano dhaqaale)
    Ciqaabaha Fal dambiyeedka Hawlwadeen waliba oo ku kaca qodob ka mid ah qodobbada ku xusan qodobka xeerka
    a. lagu soo wargaliyaa xarunta Xiriirka imtixaanka iyadoo la faah faahinayo faldanbiyeedka uu ku kacay
    b. laga saaro dhammaan hawlaha imtixaanaadka si abid ah;
    c. lagala wareegaa agabka imtixaanka uu hayo
    d. lagu wariijiyaa police-ka
    e. lagu oogo dacwad maxkamadeed oo keeni karta xabsi ama/iyo ganaax.

**FULIN WAACAN**

**Mohamed Hashi Dhoorre**
**Wasiirka waxbarashada, Hiddaha &**
**Tacliinta Sare ee Galmudug**

-